


Guddida Fulinta ee maamulka Kristiansand waxay maanta 23. febraayo gashay shir aan caadi ahayn, waxaanay go'aamisay in la xidho goobaha jimicsiga iyo dabaasha, in la madnuuco shubista alkaahoolka waxaana la rabaa in qof kasta isticmaalo af-dabool (munnsbind) markuu ku jiro basaska iyo dukaannada.

Arrimahan ayaa lagu dhaqmi doonaa:

- Goobaha jimicsiga, hoolalka dabaasha iyo meelaha la mid ah waa la xidhayaa (meelo laga dhaafay mooyaane)
- Goobaha laga cunteeyo ma shubi karaan aalkahool/khamri
- Waa in la isticmaalo af-dabool (munnsbind) marka la joogo meelaha dadka ka dhexeeya, sida dukaannada, basaska iyo meelaha kale ee gudaha ah (marka aan la kala fogaan karin ugu yaraan 1 mitir).



Faafitaanka covid-19 ee Kristiansand wuxu u socda si ka beddelan xaaladda ka jirta magaalooyinka kale ee waaweyn ee Noorway.

Waxa hadda muhiim ah in qof kasta gacan ka geysto joojinta faafitaanka!

Waxa jira xeerar ku saabsan qabanqaabooyinka guud iyo kuwa khaaska ah – haddii aad su'aalo qabto la xirii degmadaada ama halkan eeg:

<https://www.kristiansand.kommune.no/aktuelt/2021/strengere-smittevern/>